

Dhismaha Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

Xeer Madaxweyne Lambar 02 ee 16 August 1997

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland:

- Markuu Arkay: Qodobada 128, 82, 145 iyo 124 ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.
- Markuu Arkay: Xeerka Nidaamka Garsoorka ee soo baxay 12 Juun 1962 Lam.3.
- Markuu Arkay: Xeer Lam 81/96 ee lagu dhisay Wasaaradda Caddaaladda.
- Markuu arkay: Qodobka 147 ee Dastuurka, ee ka hadlaya dhismaha hay'adaha gaarka ah.
- Isagoo tixgelinaya: Danta shaqada.

Wuxuu soo saaray

Qodobka 1aad Dhismaha

1. Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Qaranku wuxuu ka koobmaa Xeer Ilaaliyaha Guud iyo ku xigeenkisii oo ka hawlgala dhammaan dhulka Jamhuuriyadda Somaliland.
2. Xafiiska Xeer-Ilaalintu wuxuu u qaybsamaa waaxyahan soo socda;
 - a. Waax qaabilsan dacwadaha ciqaabta ah.
 - b. Waax qaabilsan dacwadaha iyo arrimaha madaniga ah, idaariga ah iyo kuwa Maaliyadda.
 - c. Waax qaabilsan kaydinta iyo faafinta shuruucda;
3. Xarunta dhexe ee Xafiisku waxay ku taal Hargeysa, waxaana Xafiiska ka hawlgala kaaliye sare iyo hal xisaabiye iyo tiro shaqaale hadba inta looga baahdo waaxyaha.

Qodobka 2aad

"Xilka Waaxda oogista dacwadaha ciqaabta ah"

1. Xilka waaxda oogista dacwadaha ciqaabta ah waxaa ka mid ah:-
 - b. Ilaalinta xuquuqda dawladda iyo hay'adaheeda iyo dadka aan awooda lahayn;

- t. Oogidda dacwadaha ciqaabta ah;
 - j. Racfaan ka qaadashada dacwadaha ciqaabta ah;
 - x. Ka tilmaan-bixinta baadhista dembiyada ee Booliisku gacanta ku hayaan;
 - kh. Kormeeridda xabsiyada iyo xarumaha dhaqan-celinta ah;
 - d. Diiwaangelinta, uruurinta iyo tirakoobka dacwadaha ciqaabta ah;
 - r. Dhammaan waajibyada uu saarayo xeerka nidaamka garsoorku xafiiska Xeer Ilaalinta; xeerka Habka Ciqaabta iyo qodob kasta oo Xeerka Ciqaabta ah.
 - s. Dacwadaha Dastuuriga ah;
2. Waxaa ka hawlgala waaxdan ku xigeeno Xeer Ilaaliyaha Guud; Gobol kastana waxa u jooga ku-xigeen; waxaanay hawshooda u igmadaan wakiilo.
3. Waaxdan waxaa madax ka haanaya mid ka mid ah ku-xigeenada xeer-ilaaliyaha guud oo uu magacabo Xeer Ilaaliyaha Guud, ahna kan ugu da'weyn xaga shaqada (Seniority).

Qodobka 3aad

Waax qaabilsan dacwadaha iyo arrimaha madaniga ah, idaariga iyo kuwa Maaliyadda.

1. Xilka Waaxdan qaabilsan dacwadaha iyo arrimaha Madaniga ah, idaariga iyo kuwa Maaliyadda, waxaa ka mid ah;
- b. Ilaalinta xuquuqda iyo dhawrida danaha dawladda si sharciga waafaqsan;
 - t. Ilaalinta shuruucda maamul ee dawladda iyo hay'adaheeda;
 - j. Wakiil uga noqoshada dawladda iyo hay'adaheeda maxkamadaha hortooda dacwadaha ay dhan ka yihiin markasta oo loo baahdo;
 - x. Ku gacan siinta dawladda iyo hay'adaheeda dacwadaha madaniga ah iyo kuwa Idaariga ah marka ay is difaacayaan;
 - kh. talo ka bixinta dacwadaha madaniga ah iyo kuwa idaariga ah iyo kuwa Maaliyadda
 - d. Dhexdhexaadinta isqabadka maamul ee hay'adaha dawladda gudahooda;
 - r. Diyaaritna iyo diiwaan gelinta heshiisyada ay dhinac ka tahay dawlada ama hay'adaheeda;

- sh. Xil kasta oo uu sharcigu farayo Garyaqaanka dawladda
2. Waxaa ka hawlgala waaxdan ku-xigeeno Xeer Ilaaliyaha guud.
 3. Waaxdan waxaa madax ka ahaanaya mid ka mid ah ku-xigeenada X/Guud oo uu magcaabo Xeer Ilaaliyaha Guud, oo ah kan ugu da'weyn dhinaca shaqada (Seniority)
 4. Ku-xigeenada Xeer Ilaaliyaha guud marka ay galayaan dacwadaha Madaniga, Idaariga iyo Maaliyadda waxay hay'adda ay daafacayaan ku lahaanayaan xushmada Qareenka oo dhan boqolkiiba 5%, qiimaha dacwada ay difaacayaan, oo ka dhaxaysa doodaha iyo xafiiska Xeer Ilaalinta.

Qodobka 4aad
Waaxda Kaydinta
iyo Faafinta Shuruucda

1. Waaxda kaydinta iyo faafinta shuruucda waxaa xilkeedu yahay:-
 - b. Daabacaadda, faafinta iyo kaydinta shuruucda;
 - t. Diiwaangelinta ururada samaflaka ah;
 - j. Diiwaangelin iyo xafidaada shaabada dawladda iyo hay'adaheeda.
 - x. Hawlkasta oo loo arko inay leedahay ilaalin iyo dhawrid.
2. Waaxdan waxaa madax ka ahaanaya mid ka mid ah ku-xigeenada Xeer-Ilaaliyaha Guud oo uu u magacaabo Xeer Ilaaliyaha Guud, oo ah kan ugu da'weyn dhinaca shaqada (Seniority).

Qodobka 5aad
"Mushaharka iyo Gunnada"

1. Mushaharka iyo Gunnada Xeer-Ilaaliyaha guud waa derejada A1.
2. Mushaharka iyo Gunnada Ku-xigeenada Xeer Ilaaliyaha Guud waa derejada A2.
3. Derejada Shaqaalaha kale waxaa lagu dhaqayaa xeerka shaqaalaha dawladda.

Qodobka 6aad

Maqnaashaha Xeer-Ilaaliyaha Guud

1. Markuu Xeer-Ilaaliyaha guud Jamhuuriyadda Somaliland fadhigiisa ka maqan yahay hawl darteed ama sababo kale awgeed, waxaa hawsha xafiiska sii haynaya mid ka mid ah ku-xigeenada Xeer Ilaaliyaha Guud oo uu isagu igmado.

Qodobka 7aad

Tirtirida


Waxaa la tirtiray qodob kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin Xeerkan.

Qodobka 8aad

Dhaqan gal

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa markuu Madaxweynuhu saxeexo.

Allaa Mahad Leh,


Maxamed Ibraahim Cigaal
Madaxweyne